# Isticmaalka Xirfadaha Muhiimka ah

Dowladda gobolka Washington waxay leedahay Xirfado Muhiim ah oo loogu talagalay [shaqaalaha daryeelka hore](#) iyo [kuwa da'da dugsiga.](#)







Xirfadaha waa muhiim sababtoo ah waxay:

- Qeexayaan waxa ay tahay in xirfadlayaashu ogaadaan oo ay qabtaan
- U adeegaan saldhigga go'aannada iyo dhaqamada
- Dhisaan heerar u gaar ah xirfadaysnaanta

## Maxay Muhiim u Yihiin Tababarayaasha?

Dhammaan xirfadlayaasha waxay u baahan yihiin saacado adeeg gudaha ah si ay u dhameystiraan shuruudaha horumarka xirfadeed ee doorkooda. Iyagoo isticmaalaya xirfadaha muhiimka ah, tababarayaashu waxay hubiyaan in mowduucyada ay doortaan ay dhisayaan aqoon iyo xirfado taageeraya daryeel tayo leh oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada.

Xirfadaha muhiimka ah waxay ka sheegaan ka qeybgalayaasha waxa uu tababarku dabooli doono, waxayna ka caawiyaan inay doortaan fursadaha waxbarasho ee ku habboon.

## Sidee Loogu Habeeyey Xirfadaha Muhiimka ah?

**Xirfadaha Muhiimka ah waxaa loo kala saaray Aagag Mawduuc.** Waa kuwan tusaale ahaan qaar ka mid ah aagagga mawduuca ee barashada hore:

**I. Koritaanka Cunuga iyo Barbaarinta:** fahamka sida caruurtu ay ku helayaan luuqad iyo sharaxaado hal abuur leh si ay u koraan jidh ahaan, garasho ahaan iyo bulsho ahaanba.

**II. Manhajka iyo Deegaanka Waxbarashada:** samee deegaan kaasoo siinaya khibrad waxbarasho si loo buuxiyo baahida caruurta, awoodaha iyo doonista.

**III. Cabirka Socda ee Horumarka Canuga:** lasoco oo qiimee waxa caruurtu garanayso iyo waxa la samayn karo si loo qorsheeyo oo loosiiyo manhaj kaasoo buuxiya koritaankooda iyo baahiyahooda waxbarasho.

**IV. Wadashaqeynta Qoyska iyo Bulshada:** lasamee xidhiidh adag qoysaska iyo haayadaha/ururada aad wadashaqaynta leedihiin si loo buuxiyo baahiyaha caruurta iyo si loogu dhiirigaliyo ku luglahaanshaha bulshada ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.

**V. Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqaynta:** samee oo joogtee deegaan ilaalinaya badqabka, caafimaadka iyo nafaqaynta caruurta.

**VI. Isdhexgalka:** samee xidhiidh taageero oo caruurta ah oo u tilmaam shaqsi ahaan inuu qayb ka yahay kooxda.

**VII. Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka:** samee, hirgali, qiimee oo falanqee daryeelka barbaarinta iyo goobaha waxbarasho.

**VIII. Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta:** ugu adeeg caruurta iyo qoysaska hab xirfad ku dheehantahay oo kaqaybqaado bulshada adigoo matalaya daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.

Xirfadaha da’da dugsiga waxay leeyihiin aagag mawduuc oo la mid ah kuwa barashada hore, iyadoo lagu daray labo aag oo dheeraad ah oo la xiriira Sinnaanta Jinsiyadda iyo Ka Jawaabidda Dhaqamada iyo Dhiirrigelinta Dhallinyarada.

**Qaar ka mid ah Xirfadaha Muhiimka ah waxay leeyihiin qaybo-hoosaadyo**. Waxaa loo adeegsadaa in lagu habeeyo aqoonta iyo xirfadaha ku jira aagagga mawduuca ee daboolaya mowduucyo kala duwan.

**Dhammaan Xirfadaha Muhiimka ah waa heeraysan yihiin**. Heerarku waxay u dhexeeyaan heer asaasi ah ilaa heer sare, waxaana loo qaabeeyey inay is dhisaan. Dhammaan heerarka waxay leeyihiin tilmaamayaal muujinaya aqoonta iyo xirfadaha ay tahay in xirfadlayaashu horumariyaan.


VII QORSHEYNTA IYO HORMARINTA BARNAAMIJKA

Qorsheynta iyo Qiimeynta Barnaamijka

HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu u dhaqmayaa shaqaale masuula oo ka qeybalayaa kooxda barnaamijka.
b. Wuxuu ilaalinayaa diwaanada macquulka ah.
c. Wuxuu u hogaansamayaa siyaasadaha barnaamijka wuxuuna sheegayaa shuruucda iyo sharciyada liisanka daryeelka cunuga.

HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu taageerayaa bayaanka himilada barnaamijka.
b. Wuxuu nidaaminayaa qorshayaasha, ilaalinayaa diwaanada, oo ugu gudbinayaa qoysaska iyo shaqaalaha si wanaagsan.
c. Wuxuu diyaarinayaa qorshayaasha iyo manhajka fasalka.
d. Wuxuu dooranayaa qalabka iyo agabka ku haboon dhaqangalinta.
e. Wuxuu qorayaa ujeedooyinka iyo hadafyada hawlaha.
f. Wuxuu isticmaalayaa khayraadka si loo hubiyo shaqo waxtar leh.
g. Wuxuu caawinayaa soo ururinta macluumaadka qiimeynta.

HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu hadal ku sharxayaa xidhiidhka ka dhaxeeya aragtiyaha barnaamijka iyo shaqada maalinlaha.
b. Wuxuu qorsheynayaa tababarada iyo barnaamijyada waxbarasho.
c. Wuxuu qorsheynayaa oo u baahan yahay agabka iyo qalabka haboon ee barnaamijka.
d. Wuxuu ka qeybgalayaa qorsheynta istaraatiijiyada iyo dejinta hadafka barnaamijka.
e. Wuxuu fulinayaa daraasaadka barnaamijka.
f. Wuxuu aqoonsanayaa muhiimada qiimeynta, caawinta qiimeynta waxtarka barnaamijka.

HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu isticmaalayaa aqoonta qawaaniinta fadaraalka, gobolka iyo xeerarka maxaliga, iyo nidaamyada xirfadeed si loo siiyo xeerar caafimaad iyo badqaba caruurta yar-yar iyo raadqaadka.*
b. Wuxuu diyaarinayaa manhajka barnaamijka.
c. Wuxuu u maamulayaa khayraadka barnaamijka (maaliyada, shaqaalaha, wakhtiga) si waxtar leh.
d. Wuxuu tilmaamayaa awooda lagu agaasimaayo lagana shaqeynaayo noocyada daryeelka barbaarinta iyo barnaamijyada waxbarasho.
e. Wuxuu ugu gudbinayaa si waxtarleh kooxaha gudida/golaha.
f. Wuxuu aqoonsanayaa qaababka qiimeynta wuxuuna fahmayaa xadidaadooda.

AWOODAHA MUHIIMKA AH *ee Daryeelka Barbaarinta iyo Xirfadlayaasha Waxbarashada* 37

## Sida Loo Doorto Xirfadda Muhiimka ah ee Ku Habboon Tababarka

Waxaad adeegsan kartaa habkan talaabo-talaabo ah si aad u aqoonsato aagga(agagga) mawduuca xirfadda muhiimka ah ee ku habboon iyo heerka tababarkaaga. Tababar wuxuu dabooli karaa aagag mawduuc oo xirfado muhiim ah badan. Si xirfad muhiim ah loogu

qoondeeyo tababarka, nuxurka tababarku waa inuu ahaadaa ugu yaraan hal saac.

1. Aqoonso dhagaystayaasha tababarkaaga iyo yoolalka waxbarasho
2. Dooro dukumeentiga xirfadda muhiimka ah ee ku habboon (barashada hore; da'da dugsiga)
3. Dib u eeg sharaxaadda aagagga mawduuca oo dooro midka ku habboon
4. Tag qaybahaas oo hel qaybaha-hoosaadka ee la xiriira yoolalkaaga
5. Dib u eeg tilmaamayaasha oo dooro heerarka la jaanqaadaya yoolalkaaga
6. Isticmaal aagagga xirfadda iyo heerarka aad doorotay markaad gelinayso foomka tababarka ee MERIT

### Talo ku saabsan Gelinta Tababarka ee MERIT

Hubi inaad haysato oggolaansho aad ku tababari karto aagga(agagga) mawduuca iyo heerarka ka hor intaadan gelin macluumaadka foomka tababarka. Waxaad tababari kartaa oo kaliya aagagga xirfadaha muhiimka ah iyo heerarka laguu oggolaaday. Waxaad ka heli kartaa macluumaadkan tab-ka tababarayaasha la ansixiyay ee MERIT.

## Su'aalo ma qabtaa?

If you have any questions or concerns please contact the Professional Development Team at training@dcyf.wa.gov.

Haddii aad qabto su'aalo ama walaac, fadlan la xiriir Kooxda Horumarinta Xirfadeed adigoo u soo qoraya: **training@dcyf.wa.gov**.